

**Buug yaraha Macluumaadka**

# Magangalyada Caalamiga ah ee Waddankan



**Somali**



# TUSMO

|                                                                                                  |    |
|--------------------------------------------------------------------------------------------------|----|
| 1. Badbaadada "Magangalyada" Caalamiga ah ee Beljimka .....                                      | 4  |
| 2. Goormaa la Dalban karaa Badbaadada Caalamiga ah? .....                                        | 5  |
| 3. Qaar ka mid ah Fikradaha Muhiimka ah .....                                                    | 6  |
| 3.1 Maxuu yahay Codsiga Badbaadinta Caalamiga ah? .....                                          | 6  |
| 3.2 Waa kuma Codsadaha Badbaadinta Caalamiga ah? .....                                           | 7  |
| 3.3 Waa maxay Dublin? .....                                                                      | 7  |
| 3.4 Waa maxay "Go'aanka ugu Dambeeya"? .....                                                     | 7  |
| 3.5 Goorma ayuu qofku "Mar kale Badbaadinta Caalamiga ah<br>Codsankaraa"? .....                  | 7  |
| 3.6 Maxaa Loola Jeeda "Xogta Biometric"? .....                                                   | 8  |
| 4. Hel habraaca (habka nidaamka magangalyo doonka uu u shaqeeyo).....                            | 8  |
| 4.1 Xaggee Laga Codsadaa Magangalyada Caalamiga ah? .....                                        | 8  |
| 4.2 Goorma ayuu habraacu bilaabanayaa? .....                                                     | 8  |
| 4.2.1 Samaynta iyo diiwaangalinta codsiga .....                                                  | 9  |
| 4.2.2 Soo gudbinta codsiga .....                                                                 | 13 |
| 5. Ma la'ii tixgalinayaa bahiyoyinkayga gaarka ah? .....                                         | 16 |
| 6. Dublin? .....                                                                                 | 17 |
| 6.1 Goorma ayaa Dublin la dabaqi karaa (la hirgalin karaa)? .....                                | 18 |
| 6.2 Ma la'igu celinkaraa waddan xubneedka mas'uuliyaddayda qaxootin-<br>nimo qaada? .....        | 18 |
| 7. Waaxda Socdaalka ma i maqli/dhageysandoontaa doontaa? .....                                   | 19 |
| 7.1 Waa maxay doorka shaqaalaha iyo turjubaanka? .....                                           | 19 |
| 7.2 Maxay tahay ujeedada maqalka? .....                                                          | 20 |
| 7.3 Xiritaanka (soo afjaridda) dhageysiga .....                                                  | 21 |
| 7.4 Waajibka wadashaqaynta .....                                                                 | 22 |
| 7.5 Sidee loo habeyndoona dhageysiga? .....                                                      | 22 |
| 8. Dukumeentigea la bixinayaa ? .....                                                            | 23 |
| 8.1 Inta lagu jiro nidaamka .....                                                                | 23 |
| 8.2 Kadib marka la siiyo aqoonsiga qaxootinnimo sharciga Jenefa/Geneva. 24                       |    |
| 8.3 Kadib marka la siiyo aqoonsiga badbaadada sharciga yar oo ku<br>bilowda sannadka hoose ..... | 24 |
| 8.4 Kadib diidmada codsiga caalamiga ah .....                                                    | 25 |
| 9. Ma badali karaa macluumaadka aqoonsigayga? .....                                              | 26 |
| 10. Waxaan ahay qof aan qaan-gaarin oo aan lala socon... Haddaba maxaa xal ah? .....             | 26 |
| 11. Ma i caawin karaa garyaqaan inta hawsha socoto? .....                                        | 28 |
| 12. Maxaa xal ah haddii aan doonaayo in aan ku laabto waddankayga? .....                         | 29 |
| 13. Miyaa la'i hayn (xannibi) karaa inta hawsha socoto? .....                                    | 30 |
| 14. Maxuu ku samaynayaa xafiiska socdaalku xogteyda gaarka ah? .....                             | 30 |
| 15. Cinwaanno waxtar (faaido) leh .....                                                          | 31 |

# 1. Magangalyada caalamiga ah ee Beljimka

Qof kasta oo ku sugan arlada Beljim, waxa uu badbaadada calamiga ah waydiisan karaa Hay'adaha Beljimayska ah ee arrintan fulin kara.

Halkaan waxaa hoos imaanaaya maamullada ku lug leh:



## Xafiiska laanta socdaalka (DVZ/OE)

Xafiiska Laanta Socdaalka waa hay'adda masuulka uga ah waddanka Beljimka soo galitaanka dhulka, deggenaanshaha, dajinta iyo ka saarista (cayrinta) dadka ajaanibta ah.

Xafiiska Socdaalka ayaa diiwaan galiya codsiga badbaadinta caalamiga ah oo go'aamin doona haddii Beljika - ama waddan kale oo xubin ah uu habaynta codsiga mas'uul ka yahay.

<https://dofi.ibz.be/>



## Wakiilka guud ee qaxootiga iyo dal laawayaasha (CGRA)

CGRA waa hay'adda awoodda u leh baaritaanka codsiga magangalyada caalamiga ah. CGRA. Ayaa qiimeyn doonta baahida Badbaadinta.

<https://www.cgra.be/>



## Golaha xallinta murannada (CCE)

CCE waa maxkamad Maamul

Haddii qofka ajnabiga ah uusan raalli ku ahayn go'aanka ay gaareen DVZ/OE-xafiiska Laanta socdaalka ama CGRA-wakiilka qaxootiga, waxa uu racfaan go'aankaas uga qaadan karaa CCE.

Kani waxuu xukumi doonaa racfaanka.

CCE waxa kale o ay awood buuxda u leedahay in ay ku siiso xaalad (Qaxootinnimo ama Badbaadin hoose).

CCE waxay sidoo kale go'aan ku gaari kartaa in faylkaaga ay dib ugu celiso DVZ/OE ama CGRA, waa haddi loog baahdo in baaritaan dheeraad ah la sameeyo.

<https://www.rvv-cce.be/>



## Golaha dawladda (CE)

CE waa Maxkamad racfaan loo qaadan karo, kaas oo ka dhan ah go'aanka ay gaartey CCE.

<https://www.conseildetat.be/>



## Wakaaladda federaalka soo dhaweynta magangalyo doonka (Fedasil)

Fedasil waxay qaabilsantahay soo dhaweynta codsadyaasha magangalyada caalamiga ah. Fedasil waxay kaloo masuul ka tahay baaritaanka caafimaad ee dhammaan codsadyaasha magangalyada caalamiga ah.

Taas waxaa dheer, in sidoo kale Fedasil ay bixiso taageero noqosho ama ku laabasho iskaa ah ikhtiyaar ah ee waddanki asalka ahaa.

<https://www.fedasil.be/>

## 2. Goormaa la dalban karaa magangalyada caalamiga ah?

Waxaad waddanka Beljijmka magangalyada caalamiga ah waydiisan kartaa haddii aad ka baqaysid in waddankaagi dabagal lagugu sameeyo ama la guugu geysto dhibaato weyn.

Haddii Beljim ay mas'uul ka noqoto habeynta codsigaaga, CGRA ayaa marka hore baaritaan sameyndoonta kaas oo lagu eegayo in aad xaq u leedahay helitaanka xaalad qaxootinnimo. Haddi arrintu sidaan noqon waydo waxaa la sameyn doonaa baaaritaan lagu eegaayo in aad xaq u leedahay badbaadinta hoose.

**Akhri wax badan oo ku saabsan Dublin, hoos barta 6. Dublin**

## **XAALADDA QAXOOTINNIMO**

Xaaladda qaxootinnimo waxaa lagu siin karaa haddii aad ka baqayso in lagu dhibaateeyo sababtoo ah jinsiyaddaada, diintaada, dhalashadaada, fikirkaaga siyaasadeed ama in aad ka tirsantahay koox gaar ah oo bulshada ka mid ah IYO haddii aadan isku halleyn karin badbaadada maamulladaada (waddankaaga).

Shuruudahaan waxaa lagu dajiyey heshiiska Geneva dd. 28 Luulyo 1951 (sidoo kale loo yaqaan “heshiiska qaxootiga”).



## **XAALADDA MAGANGALYO KAAB (HEERKA KA HOOSEEYA QAXOOTINNIMADA)**

Haddi aad buuxinwaydo shuruudaha laguugu aqoonsanayo qaxootinnimo, laakiin aad wali khatar aad dhibbato weyn u galaysid marka aad ku laabatid waddankaaga, waxaa lagu siin karaa xaaladda magangalinta heerka hoose.

### **Dhibaato weyn macnaheeda waa:**

- Xukun dil ah ama deldelaad; ama
- jirdil ama beni aadantinnimo darro ama yasitaan ama ciqaab loogu geysto codsadaha gudaha waddankiisa; ama,
- khatar weyn oo ku wajahan nolasha qofka rayidka ah iyadoo ay ugu wacantahay rabshado aan loo meel dayin haddii uu dhaco iska hor imaad hubeysan oo caalami ah ama gudaha ah.

## **3. Qaar ka mid ah fikradaha muhiimka ah**

### **3.1 MUXUU YAHAY CODSIGA MAGANGALYADA CAALAMIGA AH?**

Haddii aad weydiisato magangalyo hay’adaha Beljimka cabsi aad ka qabto in lagu dhibaateeyo ama lagu geysto halis weyn ka dib marka aad ku laabato waddankaaga, taasi waxay ka dhigantahay in aad samaysey “codsi magangalyo caalami ah”.

### 3.2 QOFKEE AYAA AH CODSADE MAGANGALYADA CAALAMIGA AH?

Haddi aad ka codsatay hay'adaha Beljimka ee arrintani awooda magangalyada caalamiga ah, markaas waxaad tahay “*codsade magangalyada caalamiga ah*”, illaa iyo inta go'aan kama dambeys ah laga qaadanaayo codsigaaga.

### 3.3 WAA MAXAY DUBLIN?

**Ka aqriso in badan oo ku saabsan Dublin barta 6. Dublin**

Yurub gudaheeda, hadba waddaankii aad dooneysid kama heleysid magangalyada caalamiga ah. Halkan qawaaniintu waa isku xiranyihiin. Xeerarkaano waxay ku mideysanyihiin xeerka - Dublin; waa xeer go'aaminaaya “*waddanka Dublin*” ee codsiga magangalyada caalamiga ah nidaaminaaya. Isla marka aad codsiga magangalyada caalamiga aad ka samayso Beljimka, ayaa Xafiiska laanta socdaalku uu baari doonaa in Beljimka ama waddan kale oo “*xubin-Dublin*” ah uu codsigaaga habeeyo.

### 3.4 MUXUU YAHAY “GO'AANKA KAMA DAMBEYSTA AH”?

Haddii go'aan laga gaaro codsigaaga (*taas oo macnaheedu yahay in lagu diido sharciga magangalyada caalamiga ah*) wax dambe oo racfaan “abiil” ahna aan laga qaadan karin go'aankan kama dambeysta ah (*sida ku cad sharciga ajaanibta*), marka tani macnaheedu waa “go'aan kama dambeys ah”.

### 3.5 GOORMA AYUU QOFKU KA HADLAYAA “CODSIGA SOO SOCDA EE“MAGANGALYADA CAALAMIGA AH”?

Haddii aad horey codsiga magangalyada caalamiga ah aad u gudbisay Beljimka, kaas oo go'aan kama dambeys ah laga qaatay IYO taa kadib aad mar kale codsi samayso; marka tani waa “codsi badbaadada caalamiga ah oo daba socda “ku xiga” codsigii koowaad”.

Sidoo kale codsiga kuwan daba socda - oo asagana go'aan kama dambeys ah laga qaatay - wuxuu asagana noqonaayaa marwalba “codsi ku xiga ama daba socda kii ka horreeyay”.

### 3.6 MAXAA LAGU MACNAYN KARAA “ XOGTA BIOMETRIC”?

Qof kasta oo codsada magangalyada caalamiga ah waxaa laga qaadayaa “xogta biometric”; taas macnaheedu waa qofka oo laga dhigo”qaado” faraha iyo sawir wajiga ah (foto).

Kuwaan waxaa loo isticmaali karaa in lagu sameeyo is barbardhiga (otomaatigga ah) ee biometric. “tan macnaheedu waa in qofka farahiisa iyo sawirkiisa lagu heli karo xogtiisa”.

## 4. Hel habraaca “qaabka uu u shaqeeyo nidaamka magangalyo doonka”

### 4.1 XAGGE LA WAYDIISAN KARAA MAGAGALYADA CAALAMIGA AH?

Qofka doonaaya in uu Beljimka waydiisto magangalyada caalamiga ah, waa in uu **sida ugu dhakhsaha badan isaga soo xadiriyo “dhiibo” laanta socdaalka “xafiiska adeegga arrimaha ajaanibta”**.

Mar marka qaarkood waa suurtagal in magangalyada la waydiisto:

- Agga **xuduuda** iyadoo la waydiisanayo hay’adaha u xilsaaran ilaalinta/koontaroolidda xuduudda
- Xarunta **dadka sharci darrada ah “lagu hayo” gudaheeda** ayadoo la waydiisanaayo shaqaalaha laanta socdaalka,
- **Xabsiga gudihiisa** iyadoo la waydiisanaayo guddoomiyaha xabsiga.

### 4.2 GOORMA AYAA HABRAACU (NIDAAMKU) BILAABANAYAA?

Habraacu dhaqso uma bilaabanaayo. Halkan waxaa la qaadaaya tallaabooyin kala duwan “waliba siday u kala horreeyaan”:

- In codsiga la sameeyo
- In codsiga la diwaan galiyo
- In codsiga la dalbado

Goob joog ahaanshahaaga shaqsiyeed waa lagama maarmaan tallaabo kasta oo saddexdan tallaabo ka mid ah.



#### 4.2.1 Samaynta iyo diiwaangalinta codsiga

Marka aad arlada beljinka soo caga dhigatid oo doonaysid in aad iska dhiibtid, waa in aad iska soo xaadiriso adeegga arrimaha ajaanibta”laanta socdaalka”.

DVZ/OE”xafiiska socdaalku” wuxuu sida ugu dhaqso badan isku dayayaa in uu codsigaaga uu diwaangaliyo isla maalintaas.

Marka codsigaaga la diwaangalinayo waxaa lagula socodsiiin doonaa “sharrixidoonaa” qaabka aad codsigaaga u soo gudbin kartid. Habraaca”hawshaada” waxaa socodkeedu bilaabanaayaa marka aad si rasmi ah codsigaaga u soo gudbisid.

Haddii codsiga isla maalintaas la diwaangalinwaayo, waxaa lagu siin doonaa caddayn in aad isa soo xaadirisey. Dukumiintigaas ayaad ku muujin kartaa in aad codsiga magangalyada caalamiga ah aad samaysey. Waqtigaa laga bilaabana waxaad tahay codsade magangalyada caalamiga ah.


Diwaangalintu waxaa ka mid ah:



#### Samaynta aqoonsiga

Xafiiska Socdaalka ayaa marka diiwaangalinta samayn doona aqoonsigaaga (*magaca aabe iyo awoowgaa, magacaaga koowaad, taariikhda dhalashada, goobta dhalashada, jinsiyadda*). Haddii aad haysato dukumiinti,asaga ayaa laga qori doonaa. Haddii aadan haysan dukumiinti/waraaqo, waxii aad afkaaga ka sheegto ayaa la qori doonaa.

Marka waa lama huraan, in aad haysato oo aad keentid Xafiiska Socdaalka ”DVZ/OE” haddii aad haysatid dukumiintiga asliga ah, ama sawirka “koobiga” dukumiintigaas,



### Helitaanka xog kale oo muhiim ah

Si diwaangalintu u dhammeystiranto, wuxuu Xafiika Socdaalku hubin doonaa marka aad Beljimka timid, ama aad cinwaan/hooy ku haysatid Beljimka ama aad u baahantahay hooy ama xero.

Waxaa sidoo kale lagu waydiin doonaa inta hawshu kuu socoto in aad u doonaysid in turjubaan ku caawiyo.



### Go'aaminta hadday suurta gal tahay in codsadaha ay nuglaan "halis u yahay waxyaabaha qaarkood" haysato

Sidoo kale is diwaan galinta waxaa lagu waydiin doonaa hadday jirto nuglaan "waxyaabaha qaarkood halis u tahay". Waa muhiim marka loo eego soo dhaweynta iyo marka loo eego sii wadidda hawlahaaga in aad sheegto haddi ay ku haysato nuglaan gaar ah "halis aad u noqon karto waxyaabaha qaarkood" taas oo ay tahay in la tixgaliyo.



### In codsadaha loo sheego xuquuqdiisa iyo waajibaadkiisa

Ka codsade badbaadinta caalamiga ah ahaan waxaad leedahay dhowr xuquuq, laakiin sidoo kale waxaa ku saaran dhowr waajibaad.

Sidaa darteed waxaad ka codsade ilaalinta caalamiga ah ahaan **xaq u leedahay soo dhaweyn "hooy"** aadna ka heli kartaa Fedasiil **cawimaad maaddi ah**.

**Fiiro gaar ah "ogsoonow": xuquuqda soo dhawaynta waa la xaddidi karaa.**

Taas waxaa xiga in ka codsade ilaalinta caalamiga ah ahaan ka badbaadayso dib u celin khasab "jujuub" ah. Taas macnaheedu wuxuu yahay in aan laguq celineyn

waddankaagi hooyo inta hawshaadu”codsigaagu” kuu socdo, marka laga reebo kiisaska lagu sheegay Sharciga Ajaanibta.

Waxaa intaa sii dheer in hay’adaha Beljimka aysan wax xiriir ah la yeelan doonin marnaba ama macluumaad la wadaagi doonin maamullada waddankii aad u dhalatey.

### **Fiiro gaar ah (ogsoonow): xuquuqda soo dhawaynta waa la xaddidi karaa.**

Dhanka kale waxaa adiga ka codsade ilaalinta caalamiga ah ahaan lagaa sugayaa in aad marwalba runta sheegtid aadna **wadashaqeyn buuxda** ku deeqdid inta howshaadu socoto.

Haddii aad haysatid dukumiinti aqoonsigaaga, **waad ku qasbantahay** inaad sida ugu dhakhsiinyaha badan waqtiga is diwaangalinta codsigaaga. Sidoo kale **waxaad ku khasbantahay** in aad sida ugu dhaqsaha badan aad u dhiibto wax allaale iyo waxii kale oo aad hayso oo caawinkara hay’daha awoodda u leh go’aaminta waddanka-xubinta ah ama nidaaminta codsigaaga.



#### **Dukumiintiyadee muhiim ah?**

Dukumiintiyada walba oo u saabsan da’daada, asalkaaga (sidoo kale kuwa familkaaga), aqoonsigaaga, dhalasho (ooyinkaaga), waddan(amo) iyo meel(o) aad horey u soo joogi-jirtey, Macluumaad ku saabsan codsiyo ilaalinta caalamiga ah oo aad horey u samaysay, safar(ro), dukumiinti aqoonsi, ... waa muhiim, laakiin wax allaale iyo waxii dukumiintiyada ah oo muujinaya dhibkii kugu soo gaaray waddankaagi hooyo waad keeni kartaa.

Dukumiintiyada oon la dhiibin, ama dukumiintiyada qaarkood in la dhiibo la diido, waxay muujin kartaa wada shaqayn la'aan.

**Wada shaqaynta oo hakad la galiyana** waxay sababi kartaa in codsigaaga lagu xayiro "xannibo" meel gaar ah, ama codsigaaga si deg-deg ah uu wakiilka qaxootiga "CGVS/CGRA" u habeeyo "nidaamiyo", waa haddii Beljimka ay iyadu ku qasbantahay in ay codsigaaga habayso ama nidaamiso.

**Waxaa lagu sheegi doonaa xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga inta ay socoto diwaangalinta codsigaaga**



### Qaadista xogta biometric (faraha iyo sawir)

Shaqaaale ka socda Xafiiska Socdaalka ayaa waxuu qaadi doonaa sawirkaaga iyo farahaaga marka la diiwaangalinayo codsigaagaaga ilaalinta calamiga ah. Ayadoo la tixraacaayo farahii lagaa dhigay, waxaa la hubin doonaa in aad horay fara ugu lahayd Xafiiskan Socdaalka ama waddan kale oo xubin-dublin ah.

Sawirka waxaa lagu dari doonaa faylkaaga maamulka waxaa kale oo lagu dari doonaa dukumiintiyo kala duwan, kuwaas oo aad ka heli doonto Xafiiska (waaxda/laanta) Socdaalka taasoo qayb ka ah habraacaaga (nidaamkaaga).



Macluumaad dheeraad ah ook u saabsan diwaan galinta waxaad dib uga heli kartaa mareegta "websaytkan":  
<https://tinyurl.com/dpipresentationENG>



## Faahfaahinta xiriirka:

Office des étrangers (DVZ/OE)  
Département Protection internationale  
e-mail : [registration@ibz.fgov.be](mailto:registration@ibz.fgov.be)

### 4.2.2 Soo gudbinta codsiga

Maalinta is diwaan galinta ama ugu dambeyn 30 maalmood gudahood marka aad samayso codsigaaga ka dib, waxaa lagu siin doonaa fursad aad ku soo gudbiso codsigaaga.

Marka codsiga la gudbinayo, waa in la fuliyaa sharci ahaan dhawr waajibaadyo

#### Doorashada deegaanka gudaha Beljimka



Codsade kasta waxaa ku waajib ah in uu doorto "sheegto" cinwaan. Xafiiska Socdaalku wuxuu ku weydiin doonaa degaanka aad dooratay. Kani wuxuu noqon karaa cinwaanka si rasmi ah aad u deggentahay, laakiin waxaad adarees ka dhigan kartaa garyaqaankaaga "looyarkaaga", saaxibbadaa agtooda, famil, ... gudaha Beljimka.

Xafiiska Socdaalka "DVZ/OE" iyo kan wakiilka guud ee qaxootiga "CGRA" waxay waxii is gaarsiin "waraaqo" ah oo la xiriira hawlahaaga (gaar ahaan casumaadaha "u yeeridda", su'aalo warbixin dheeraad ah, go'aamada, ...) ku soo diri doonaan cinwaankan.

Haddi aadan haysan cinwaan, waxaa cinwaan kuu noqon doona xafiiska wakiilka guud ee qaxootiga "CGRA"; waxiii waraaqo ahna cinwaankan ayaa laguugu soo diri doonaa. Marka waa in aad marwalba aad iska soo xaadiriso xaafiiskan si aad waraaqaahaaga u qaadatid.

Sidoo kale **sharci ahaan waa khasab** in marwalba aad ogaysiiso”wargalisid” xafiiska socdaalka “DVZ/OE” iyo xafiiska wakiilka guud ee qaxootiga “CGRA” haddi cinwaankaaga ama meesha adarees kuu ah aad badashid.



Foomkan waxaa lagu daray (siyaadiyey) buug-yarahaan waxaana sidoo kale laga heli karaa mareegta (websaytka) laanta Socdaalka DVZ/OE:



<https://tinyurl.com/dpiformsENG>



**Ogsoonow:** Haddii aad cinwaankaaga baddashid oo aadan isla markiiba aadan u soo gudbin Xafiiska Socdaalka iyo kan Wakiilka qaxootiga “cinwaankaaga cusub”, taasi waxay natiijo diidmo ah ku keeni kartaa codsigaagi magangalyada caalamiga ah Waraaqaha waxaa had iyo jeer lagu diri doonaa cinwaankii ugu dambeeyay ee la doortay, taas oo macneheeda yahay in aadan heli doonin dukumiintiyo gaar ah ama aad heli doonto goor/wakhti dambe, arrintaas oo ay sabab u tahay cinwaanka cusub oo aan la soo gudbin..

FR | NL



### Go'aaminta luuqadda la adeegsanayo

Inta diwaangalinta ay codsiga waxaa la go'aaminayaa luuqadda la isticmaali doono inta ay hawsha”codsiga”socoto. Luuqaddu waxay noqon kartaa Faransiis ama Nederland”Hollandeys”.

Haddi aad ku hadasho Faransiis ama Nederland kugu filan, waad dooran kartaa in haswshaadu kuugu socoto Faransiis ama Nederland.

Haddii aadan ku hadlin Faransiis ama Nederland kugu filan, Xafiiska Socdaalku isaga ayaa go'aaminaya "cayyimaya" luuqadda nidaamka "hawsha" lagu wadaayo si ay dar dar u galiso baahida adeegyada iyo maamulka.

Marka la go'aamiyo luuqadda loo adeegsanayo nidaamka "habraaca" , luuqaddaas kaliya ayaa la adeegsanaya inta uu socdo nidaamka, marka sidoo kale isla luuqaddas ayay adeegsanayaan Wakiilka guud ee qaxootiga CGRA iyo Glaha xallinta murannada ajaanibta "maxkamadda" de CCE.

Sidoo kale isla luuqaddas ayaa loo adeegsan doonaa nidaamka haddii dib aad isu dhiibtid.



### Soo saaridda lifaaqa 26 ama lifaaqa 26quinquies

Xafiiiska Socdaalaku wuxuu marka aad codsigaaga dalbato gacanta kaa saari doonaa lifaaqa 26 (haddi kani uu yahay codsigaagii koowaad), ama lifaaqa 26 quinquies (haddi kani uu yahay dalab dib isu dhiibid ah).



#### Ogsoonow:

Haddii aad ka soo jawaabi waydo casumaadda si aad u soo gudbiso codsigaaga, codsigaagu sharci ahaan way u dhammaan doontaa.. Laga bilaabo waqtigaas ma tihid codsade badbaadinta caalamiga ah. Haddii aad rabto in aad codsigaaga mar "waqti/maalin" kale aad soo gudbiso, Dib ayaa codsigaaga mar kale loo furi doonaa.

Dukumiintigaan waxaa ku xusan warbixinta aqoonsigaaga, sidoo kale sawirkaaga. Dukumiintigu wuxuu caddaynayaa in aad codsiga badbaadinta caalamiga soo gudbisatey.

Dhab ahaantii dukumiintigaanu maaha caddeyn aqoonsi ama dhalasho.

## 5. Ma la’ii tixgalin doonaa bahiyooyinkayga gaarka ah?

Inta lagu jiro hawshaada waa lagu dhagaysan doonaa, Sidaa darteed waxay sawir fiican ka heli doonaan xaladdaada qof ahaaneed iyo sababta codsigaaga. Codsade kasta waa in fursad isku mid ah uu helo si sida ugu wanaagsan uguna macquulsan iyo xaaladda ugu wanaagsan uu shekadiisa u sheegi karo, sidaa darteed codsigiisa uu u noqdo mid si sax ah go’aan looga gaari karo.

Qof shaqale Xafiiska Socdaalka ah iyo adiga waxaad wada buuxindoontaan liisto su’aalo ah si loo hubiyo in xaaladdaada qof ahaaneed ay u baahantahay in lagu tixgaliyo waxyaabaha qaarkood, si lagu siiyo fursad aad jawaabahaaga ugu soo gudbisid sida ugu wanaagsan oo ugu macquulsan. Iyada oo ku saleysan jawaabahaaga, ayuu shaqaalaha go’aamin doonaa taageero gaar ah lagu bixin karo xaalaaddaada gaar ahaaneed.

Waa maslaxaddaada in aad sida ugu macquulsan iyo si buuxda uguna macquulsan su’aalaha uu ku waydiin doono shaqaaluhu aad uga jawaabtid, aadna keentid sida ugu dhakhso badan wax kasta oo baahidaada muujin kara”caddaymo waa haddaad heli kartid”. Qaabkaas ayaa laguugu tixgalin karaa baahiyooyinkaaga gaarka ah.

Mar walba waxaad fursad u leedahay in aad gadaal ka keentid waxii akhbaar dheeraad ah iyo waxyaabo kale”caddaymo iwm”.





## 6. Dublin?

Xaqiiqo ahaan, in aad Beljimka joogtid aadna waydiisatey qaxootinnimo, macnaheedu maaha in ay Beljimka ootomaatik codsigaaga nidaaminayso.

Yurub gudaheeda waxaa jira sharciyo go'aaminaya waddanka mas'uul ka ah nidaaminta codsiga magangalyada caalamiga ah. Sharciyadan waxaa lagu go'aamiyey **Heshiiska Dublin**.

Cf" heshiis". Xeerka 604/2013 ee Baarlamaanka Yurub iyo Golaha ee 26 juni 2013 lagu dajiyey shuruudaha iyo hababka lagu go'aaminaayo waddanka - xubinta ee mas'uul ka ah nidaaminta codsiga ilaalinta caalamiga ah ee uu soo gudbiyey qof u dhashay waddan saddexaad ama qof dal-laawe ah oo loo gudbiyey mid ka mid ah dowladaha xubnaha ka ah



Sharciyadan, kuwaas oo heshiis lagu wada gaaray, waxay ka hirgalayaan 31 waddan, oo ay ku jirto Beljimka.

Ka hor inta aan la baarin ujeedada qaxootinnimadaada, marka hore waxaa la baari doonaa waddanka - marka la tix raaco heshiiska "xeerka" Dublin - codsigaaga magangalyada caalamiga ah kaaga socon doono "nidaamin doona".



Is diiwaangalinta waxaa lagu siin doonaa buug yare macluumad badan ku qoran yihiin "waxaan magangalyo waydiistay yurbta midowday-waddanke ayaa dalabkayga nidaaminaya?"  
ontvangen met meer informatie.



Buug yarahaan asagoo ku qoran luuqado kala duwan waxaanad dib uga heli kartaa mar kale shabakada "websiyatka" Xafiiska Socdaalka ee DVZ/OE: <https://tinyurl.com/DPIDublinENG>

## 6.1 GOORMA AYAA DUBLIN LA HIRGALINAYAA?

Xeerka Dublin wxuu bixiyaa shuruudo kala duwan kuwaas oo ku salaysan in la go'aansan karo in la bilaabo baaritaan-Dublin. Tani waxay imaanaysaa marka la helo macluumaad "xog" ku salaysan, sida dukumiinti aqoonsi, natiijada ka soo baxda faraha la qaado, macluumaad kuwaas oo ay Beljimka u soo gudbiyaan waddammada xubinta la ah, laakiin sidoo kale waxay ku salaysantahay adiga waxii aad sheegato..



Waxaa lagu siin doonaa buug yaraha “waxaan ku jiraa nidaamka Dublin - maxaa taas loola jeedaat?” marka la go’aansado in la bilaabo waydiinta Dublin ee codsigaaga. Buug yarahaan asagoo ku qoran luuqado kala duwan waxaanad dib uga heli kartaa mar kale mareegta”websiyatka Xafiiska Socdaalka DVZ/OE:



<https://tinyurl.com/DPIDublinENG>

Haddi baaritaanka ay ku caddaato in Beljimka aysan mas’uul ka ahayn codsigaaga badbaadada caalamiga ah nidaamintiisa, waxaa laguu sheegi doonaa **go’aandiidmo ah oo ah in aadan joogi karin Beljimka amarnalagugu siin doono inaad waaddanka isaga baxdid**. Hadday sidaas noqoto, waa inaad si iskaaga aad u aaddo waddanka- xubinta ah ee mas’uuliyaddas iska leh.

Haddii si kastaba ha ahaatee ay noqoto in Beljimka mas’uuliyadda codsigaaga nidaaminayso, waxay Laanta socdaalku DVZ/OE faylkaaga - suurta gal ka dib waraysi dheeraad ah- u gudbinaysaa Wakiilka Guud ee Qaxootiga CGRA, kaas oo codsigaaga go’aamindoona.

## 6.2 MA LA’IGU CELINKARAA WADDAN XUBNEEDKA MAS’UULI-YADDAYDA QAXOOTINNIMO QAADA?

Haa, xaaladaha qaarkood tani waa suurta gal.

Markaas waxaa lagugu haynkaraa meel gaar ah (xero xiran), si kastaba ha ahaate waa in lagugu wareejiyo waddan-xubneedka mas’uulka kaa ah.

## 7. Waaxda socdaalka ma i “maqli/dhageysan” doontaa n?

Qof kasta oo codsade magangalyada caalamiga ah waxaa dhagaysanaya Laanta Socdaalka DVZ/OE tanna waa sida ugu dhaqso badan ka dib marka codsiga la soo gudbiyo. Dhagaysiga “waraysiga” waxuu dhici karaa isla maalinta codsiga la soo gudbiyo ama sida ugu dhaqsaha badan ka dib marka codsiga la soo gudbiyo. Markaas codsadhaha waxaa lagu casuumayaa inuu mar “taariikh” kale uu dib isaga soo xadiriyo Xafiiska Socdaalka DVZ/OE.



**Fiiro gaar ah:** Haddi aadan ku imaan karin taariikhda la sii saadaaliyey, waa in aad tan sida ugu dhaqsaha badan ula soo socdsiiso Xafiiska Socdaalka DVZ/OE. Waana in aad soo gudbiso daliil dhab ah. Tusaale ahaan inaad keento warqad dhakhtar haddi aad xanuunsatey oo kale.

Haddii muddo 15 maalmood gudaheeda - ka dib taariikhda yeeritaanka - aad iska soo xadirin waydo Laanta Socdaalka DVZ/OE, waxaa loo qaadanayaa in aadan wax dan ah ka lahayn sii waddida kiiskaaga waxaana loo arkaayaa in aad codsigaagii magangalyada caalamiga ah aad iska joojisay “xirtay”. Markaas Xafiiska Socdaalka OE waxuu ku siin karaa amar ah in aad waddanka isaga baxdo.

### 7.1 WAA MAXAY DOORKA SHAQAALAHA IYO TURJUBAANKA?

Bilowga dhagaysiga, shaqaalaha dhagaysiga qabanaya ayaa kuu sharxaya doorkiisa iyo doorka turjumaanka.

Haddii marka aad is qorayso aad waydiisato in uu ku caawiyo tujumaan, turjumaanku wuu xadiri doonaa dhagaysiga oo dhan.

Doorka turjumaanku wuxuu gaar ahaan ku xaddidanyahay in uu si wanaagsan kuugu turjumo wada hadalka aad la yeelanaysid shaqaalaha Xafiiska Socdaalka DVZ/OE. Turjumaanku ka qof ahaan sooma dhexgali karo faylkaaga ama aragtidiisa kama dhiiban karo sheekadaada wax

saamayn ahana kuma yeelan karo go'aanka la qaadanayo. Turjumaanku waa inuu marwalba ahaado mid toosan oo dhex-dhexaad ah uuna ixtiraamo asraarta shaqada..

Haddii bilowga dhagaysiga ama inta lagu jiro dhagaysiga dhibaatooyin xagga isgaarsiinta ah jiraan ee dhanka turjumaanka (tusaale ahaan aadan si wanaagsan u fahmayn turjumaanka), isla markiiba waa in aad sheegto. Haddi sababo shaqsi ahaaneed, kuwaas oo la xiriira ujeedooyinkii-cararkaaga, oo ku kala dooran lahayd shaqaale/turjumaan xagga jinsiga dhaddig"rag"/"lab"dumar", jinsi ahaan, waa in aad sida ugu dhaqsaha badan u soo gudbisid. Hay'aduhu si qiyaasa ayay ugu xisaabtami doonaan.

Shaqaalaha dhagaysiga daadihinaaya waxuu kuu sharrixi doonaa wax ku saabsan u jeedada dhagaysiga,sida dhagaysigu u socondoono iyo waxa saxda (dhabta) ah ee adiga lagaa filaanaayo.

## 7.2 MAXAY TAHAY UJEEDDADA MAQALKA?

Dhagaysi kasta oo la qaado wuxuu ku xiranyahay xaaladdada gaar ahaaneed. Halkan waxaa jira fursado kala duwan:



### Dhagaysi ku saabsan Dublin

Haddi arrintu ay u muuqato in Beljimka mas'uuliyadda codsiga nidanidaamintiisa aysan lahayn, Dhagaysigu wuxuu ku saabsanaan doonaa Dublin.

Shaqaalaha qaadaya waraysiga, tallaabada ugu horreysa uu qaadayo waxay tahay in uu aruuriyo macluumaadka ku saabsan aqoonsiga codsadaha, xaaladda guurka,familka,qoyska;safarka illaa iyo Beljimka, iwm.

Intaa waxaa dheer, in macluumaadka muhiimka ah la isu keeno taas oo muhiim ah si loo baari karo waddanka xubinta ah oo mas'uuliyadda codsiga nidaamin kara.



### Dhagaysiga waraysiga koowaad

Marka arrintu codsiga koowaad noqoto, wax muujinayana aysan jirin in waddanka xubinta ka ah uu masuuliyadda codsiga nidaaminaayo, Shaqaalaha qaadaya waraysiga,

tallaabada ugu horreysa uu qaadayo waxay tahay in uu aruuriyo macluumaadka ku saabsan aqoonsiga codsadhaha, xaaladda guurka, familka, qoyska; safarka illaa iyo Beljimka, iwm.

Waxaa intaas dheer waxuu shaqaalaha su'aalo waydiin doonaa codsadhaha kuwaas oo loogu tala galay Wakiilka Guud ee Qaxootiga CGRA (kuwaas oo si gaaban looga hadli doono ujeedada caraka) jawaabta codsadhaha uu qori doono.



### **Dhagaysiga codsiga isku daba xiga”dib isu dhiibid”**

Haddii uu codsadhaha horay Beljimka qaxootinnimo uga soo codsadey, shaqaaluhu waxa uu dhagaysan doonaa ujeedada cararka ee codsadhaha, laakiin kaliya “waxii cusub uu ku soo kordhin karo wareysiyadii hore” iyo sababta codsaduhu markii hore u keeni waayay ama u sheegi waayay waxyaabahan cusub. Codsaduhu wuxuu muujin doonaa sabata uu ugu malaynaayo in waxyaabahan loo tix galin doono si uu ugu helo aqoonsi qaxootinnimo.

### **7.3 XIRITAANKA DHAGAYSIGA**

Dhammaadka dhagaysiga waxii aad sheegtay waa lagu akhriyi doonaa (hadday suurto gal tahayna inuu idin caawiyo turjumaanka). Isla markaa waxaa xaq u leedahay in aad iska saxdo hadday wax kaa qaldamaan, aad baddasho ama bayyaaniso. Ka dibna waxaa lagu waydiin doonaa inaad saxiixdo waraysiga. Saxiixas waxaad ku caddeynaysaa in aad raalli ku tahay warbixinta dhagaysiga.

Haddii sababtay doonto ha ahaatee aad diido inaad saxiixdo, shaqaaluhu waxuu arrintan ku sheegi doonaa warbixinta dhagaysiga. Waxa kale oo uu kaa qori doonaa sababta aad u diiday inaad saxiixdo.

#### 7.4 WAAJIBAADKA WADA SHAQAYNTA

Shaqaalaha waxuu bilowga dhagaysiga ku xasuusin doona **waajibaadkaaga wada shaqayneed**. Waxaad ku qasbantahay in aad mar walba runta sheegto sida ugu wanaagasan oo ugu macqulana wada shaqayna la yeelatid hay'adaha. Sidoo kale waalagama maarmaan in aad sida ugu dhaqso badan aad dukumiintigaaga u dhiibtid kaas oo caddaynaya aqoonsigaaga iyo asalkaaga (sidoo kale jinsiyaddaada), sidoo kale safarkaaga ujeedada cararkaaga waad ku dari kartaa. Marka waxaad si deg-deg ah ugu soo gudbinaysaa dhammaan dukumintiga aad haysato (gaar ahaan haddaad hayso **dukumiintiga orijinaalka "asliga" ah**) xafiiska Socdaalka DVZ/OE. Taas waxaa dheer in aad soo gudbiso oo ku dadaashid waxii caddaymo kale ah oo aad ka heli kartid, suurto gal ah xagga familkaaga ama qof kale oo waddankaaga jooga ama waddan kale jooga, kaas oo kaa caawin kara arrintaas.

Wada shaqayn la'aan, Warbixin been ah ama isku day in la marin habaabiyo hay'adaha, waxay saameyn diidmo ah ku yeelan kartaa go'aaminta codsigaaga.

#### 7.5 SIDEE LOO HABEYNDONAA DHAGEYSIGA?

Waraysigu marwalba waxuu ka dhici doonaa Xafiiska Socdaalka, halkaas oo ay ku kulmi doonaan qof shaqaale ah, codsadaha iyo haddi loo baahdo turjumaanka, iyadoo waji ka waji qol wada fariisan doona halkaas oo waraysigu ka dhici doono.

Dhab ahaantii, xafiiska socdaalku DVZ/OE waxuu go'aansan karaa in wareysigu dhaco iyada oo la kala fogyahay, taasina waa haddii ay adkaato in qofku yimaado ama uusan imaan karin. Markaas waraysigu wuxuu ku dhacayaa qaab kulan – fiidiyoow tignoolajiyada, (dadka wada hadlayana ay ku kala jiraan labo qol) si sir ah aaminna ah uu wadahal ku u dhacayo.

Xafiiska Socdaalku DVZ/OE marwalba wuxuu ku dadaalaayaa in dhagaysigu qaab aaminaad ku jirto uu u dhaco gaar ahaan meel/qol xafidan, iyadoon qof kale soo gali karin, si sirta loo damaanad qaado; iyadoon loo kala eegayn haddii waraysigu waj-ka waji u dhacayo ama la kala fogyahay.

Dhagaysiga lama duubayo ama maqal ha ahaado ama muuqaal ha ahaado.

Haddi xaaladdada gaar ahaaneed darteed aadan u imaan karin wareysigaa oo aad dooneysid in fidooyow ku gashid waxaad sheegi kartaa marka aad is qoreysid, laakiin waa in aad sheegto sababta aad arrintaas u rabtid.. Shaqaale Xafiiska ayaa arrintan ku dari doona faylkaaga. Xafiiska Socdaalka ayaa arrinta xaqiiqadeeda si fiican u baari doonan.

Xafiisku waxuu marwalba ku xisaabtami doonaa go'minta mid kasta oo ka mid ah faylkaaga baahiyihiisa.

Haddi Xafiiska Socdaalku DVZ/OE ay go'aamiso in doodahaagu aysan sal lahayn, Af ahaan ayaa laguugu sheegi doonaa. Haddii loo baahdo DVZ/OE xafiiska Socdaalku dalabkaaga ah dhagaysiga masaafada fog wuu abaabuli doona, waana lagu dari doonaa faylkaaga.

Sidaadarteed waxaa waqti fiican lagugu wargalin doonaa in la qaban qaabinaayo dhagaysiga fog. Waxaa kale oo lagugu wargalin doonaa hababka wax ku oolka ah iyo habka dhageysiga u dhacaayo.

Marka codsigaaga la diiwaangalinaayo waxaa si faahfaahsan laguugu sheegi doonaa hababka dhagaysiga fog waxaadna xaq u leedahay in aad dhagaysiga fog diidid.



Macluumaad badan ook u saabsan dhagaysiga waxaad dib uga heli kartaa mareegta "websiteska" Adeegga Xafiiska Socdaalka : <https://tinyurl.com/DPIAuditionENG>



## 8. Dukumeentigea la bixinayaa ?

### 8.1 INTA LAGU JIRO NIDAAMKA (HABRAACA/HAWSHA)

Ka dib marka aad gudbiso codsigaaga waxaad 8 maalmood gudahooda iskaga xaadirinaysaa maamulka degmada aad deggentahay adigoo horay u sii qaadanaya lifaaqa 26/26quinquies.

Haddii **codsigaaga koowaad** ee magangalyada caalamiga aad soo gudbisay, waxay ku siinaysaa Laanta socdaalku lifaaqa 26. Maamulka degmadaadu wuxuu ku siin doonaa **attest van immatriculatie (warqad-oranji)**,

Haddii **codsigaaga dib isu dhiibista** ee magangalyada caalamiga aad soo gudbisay, waxaa lagu siin doonaa bijlage 26 quinquies. Dukumiintigaan waxaa kuu cusboonaysiin doona Xafiiska Socdaalka inta Wakiilka Guud ee Qaxootiga CGRA go'aan ka gaari doono codsigaaga.

Si kastaba ha ahaatee, waa la dalban karaa **aqoonsi immatriculatie (warqadda/kaarka)**, Haddii CGRA uu sheego in uu codsigaagi guddomay. Hadday sidaa arrintu tahay, laguuma cusbaysiin doono lifaaqa 26 quinquies, laakiin maamulka degmadaada ayaa aqoonsi van immatriculatie (kaarka-oranjiga) ku siin doona.

## **8.2 KA DIB AQOONSIGA QAXOOTINNIMADA**

Haddi Wakiilka Guud ee Qaxootiga CGRA ama Golaha Xallinta Murannada CCE qaxootinnimo kuu aqoonsado, waxaa lagu siinayaa caddeyn qaxootinnimo. Waxaad iska xaadirinaysaa adigoo caddaynta wata maamulka degmadaada, kaas oo caddeyntaas darteed ku diiwaangalindoona kuna siin doona A-Kaart "kaarka A" (*deggenaansho kooban/xaddidan*), oo muddo 5 sano ah.

5 sano ka dib, laga bilaabo markaad codsigaaga soo gudbisay, waxaad xaq u leedahay deggenaansho aan xaddidneyn "abadiyan ah". Markaan waxaad dalabkaaga u gudbinaysaa maamulka degmada aad deggentahay, si laguu siiyo B-kaart "kaarka-B". dalabkaan waxaa baari doona Xafiiska Socdaalka DVZ/OE.

## **8.3 KA DIB MARKA LA BIXIYO MAGANGALYADA HEERKA HOOSE**

Haddii Xafiiska Qaxootigat CGRA ama Golaha Xallinta murannada CCE uu ku oggalaado badbaadinta heerka hoose Waxaad iska xaadirinaysaa adigoo wata waraaqaha oggolaanshaha ay ku siisay CGRA ama CCE maamulka degmada aad ku nooshahaykaas oo oggolaanshahaas dartiis kugu diiwaangalin doona, diiwaanka-ajaanibta, kuna siin doona kaarka-



A" A-kaart" (*degganaansho kooban*), muddadiisuna tahay 1 sano.. Kaarka-A waxaa labo jeer cusbooneysiin kara maamulka degmada oo marwalba 2 sano ah, iyadoon wax amara laga sugin Xafiiska Socdaalka DVZ/OE. Dalabka cusbooneysiinta Kaarka-A waxaa loo soo gudbinaayaa maamulka degmada 30 illaa 45 maalmood ka hor inta aysan dhammaan muddada kaarkii hore. 5 sano ka dib, laga bilaabo marka codsiga la soo gudbiyey, waxaad xaq u leedahay degganaansho abadiyan ah. Markaas waxaad dalab u gudbinaysaa maamulka degmada aad deggantahay si lagu siiyo kaarka-B (B – kaart). Dalabkan waxaa baaritaan ku samayn doona Xafiiska Socdaalka OE.

#### 8.4 KADIB DIIDMADA CODSIGA CAALAMIGA AH

Isla marka go'aan kama dambays ah laga qaato codsiga, wuxuu Xafiiska Socdaalka DVZ/OE bixin doonaa mabda'a ahaan **amar ah in waddanka laga baxo** (BGV) maamulka degmaduna (haddii ay ku haboontahay) caddaynta (kaarka) immatriculatie(oranji-kaarka) kaala noqonayaa.

Amar dal ka bixid BGV waxaa la samayn karaa haddii:

- Haddii uu dhaco waqtigii lagu samayn lahaa abiiilka (racfaanka) looga soo horjeedo go'aanka Wakiilka Qaxootiga CGRA wax abiiil ahna aan la samayn
- Haddii Golaha Murannada Xalliya (maxkamadda) CCE ay go'aan diidmo ah ka qaadato racfaanka ama abiiilku loo soo gudbiyey

Laga bilaabo codsiga 2aad ee soo socda (= oo u dhigma codsi 3aad) waxaa si deg-deg ah loo qaadan karaa amarka dal kabaxa BGV kadib marka ay go'aan ah in codsigaaga aysan aqbalin Wakiilka qaxootiga CGRA qaadato, Haddii racfaanku (abiilku) uu go'aankaas bur-burin waayo. Amarka dal ka baxa BGV waxaa lagu sheegaa muddada aad uga baxayso waddanka. Haddii aad horay amarkaa u haysatey BGV laakiin aadan fulin, Xafiiska Soodaalka DVZ/OE ma go'aaminayo amar dal kabax cusub BGV, laakiin waxuu dib u hawlgalinaayaa amarkii hore BGV. Hadday sidaas tahay wakhti dheeraad ah waa lagu dari karaa si waddanka looga baxo. Amarka dal kabaxa BGV ama dib u hawl galinta waxaa si toos ah loogu wargalin doonaa "keeni doonaa" cinwaanka ama deegaanka la doortay.

## 9. Ma badali karaa macluumaadka aqoonsigayga?

Haddii inta nidaamku kuu socdo aad ogaato in macluumaadkaaga shaqsiyeed aysan sax ahayn, waxaad waydiisan kartaa DVZ/OE in ay kuu saxaan. Tani waxay dhici kartaa inta lagu jiro dhagaysiga "waraysigaaga" koowaad; halkaas shaqaalaha uu kuu dulmari doono macluumaadkaaga ka dibna uu ku waydiin doono in ay macluumaad kani sax yihiin. Macluumaadkan waa la badali karaa haddi ay haboontahay.

Haddii intaa waxii ka dabeeya ama nidaamyada "habraacyada/codsiyada" soo socda aad wali doonaysid in aad macluumaadkaaga aad badashid, kaliya tani waxay suurto gal tahay marka aad la timaaddo baasaboora caalami ah oo aan dhacsanayn.

## 10. Waxaan ahay qof aan qaan-gaarin oo aan lala socon...haddaba maxaa xal ah?

Haddi aad ka yartahay 18 oo waalidkaa ama qof booskii waalidkaa ku jira oo waddankii kugu haayay uusan kula socon, waxaa lagu dhihi waangalin doona sidii qof aan lala socon. Taas macnaheedu waxay tahay in shaqaale Xafiiska Sodaalka DVZ/OE oo arrintan ku takhasusay uu kula buuxin doono warqad, taas oo loo dirayo adeegga ilaalinta (daryeelidda).



**Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ilaalinta Adeegga Ilaalinta waxaad dib uga heli kartaa mareegta (websaytka) :**

<https://tinyurl.com/dpiTutellesFR>



Adeegga Ilaalintu waa hay'ad ku sugan Beljimka taas oo ku aqoonsan doonta hadday ku haboontahayna kuu geyn doona qof mas'uul kaa noqda.

Haddaad horay u joogtay Beljimka, waxaa dhici karta in hay'ad kale ay warkaaga u gudbisay Adeegga Ilaalinta mar horena aad haysatid qof mas'uul kaa ah.



**Fiiro gaar ah: Haddi da'daada laga shakiyo, waxaa la go'aansan karaa in baaritaan la sameeyo. Waxaad awooddaa in go'aanka - kaas oo lagu saleeyay natiijadii ka soo baxday baaritaanka-aad abiiil (racfaan) ka qaadan kartid, kaas oo aad u gudbinaysid Golaha Qaranka (maxkamad) de Raad van State.**

Masuulkaaga ayaa ku hagi doona inta hawshaada oo dhan lagu jiro. Tani waxay ka dhigan tahay in isaga/iyada ay heli doonaan dhammaan waxii wacitaan/u yeeritaan ah, waxii su'aalo ah oo la sharraxaayo, iyo go'aamada adiga ku khuseeya. Markaa waa lagama maarmaan in mas'uulku joogo dhegeysiga/waraysiga ka dhacaaya Xafiiska Socdaalka. La'aanteed joogitaanka masuulkaaga, dhegaysi ma dhici karo.

Dhageysiga ka dhacaya xafiiska socdaalka waxaa hogaamin doona shaqaale ku takhasusay maqalka/waraysiga caruurta. Su'aalaha lagu waydiinayo inta linta uu dhagaysigu/waraysigu socdo, waa su'aalo la waafajiyay (ku salysan) da'daada iyo qaan-gaarnimadaada.



**Diiwaan galinta codsigaaga waxaa lagu siin doonaa macluumaad dheeraad ah. "BUUG YARE LOOGU TALO GALAY QOFKA AAN QAAN\_GAARIN OO MAGANGALYO WAYDIISANAYA BELJIMKA" sidoo kale waxaad iyadoo luuqado kala duwan ah ka heli kartaa shabakada wakiilka guud ee qaxootiga CGRA adigoo u maraya linkiga(isku xiraha soo socda :**

<https://www.cgrs.be/en/publications>



## 11. Ma i caawin karaa garyaqaan inta hawsha socoto?

Inta nidaamka badbaadada caalamiga ah uu kuu socdo, waad qabsan kartaa garyaqaan ku caawiya. Halkaan adiga ayaa iska bixinaya kharashka.

Haddii dhaqaalahaagu ku filnayn in aad qareen qabsatid, waxaad mar walba dalban kartaa pro-Deadvocaat (garyaqaan bilaash ah). Garyaqaan bilaash ahi waa mid aad adiga dooranaysid ama mid lagu dooranaayo. Adiga lacag ma siinaysid garyaqaanka bilaashka ah. Halkaan waxaad u caddeynaysaa inaad magangalyo doon tahay adigoo tusaya, tusaale ahaan lifaaqa 26 ama lifaaqa 26 quinques.

Waxaa taa la socda inay jiraan ururo, ururadaas midoobey waxay ku takhasuseen u gargaaridda ajaanibta.

Laanta Jimciyaada qarammada midoobay ee daryeelka qaxootiga UNHCR waxay dammanad qaaday xuquuqda iyo daryeelka dadka qaxootiga

**Fiiro gaar ah:** Haddii ay hadhow soo baxdo in aad haysato ilo dhaqaale muhiim ah ama dakhli, waa in aad qayb ahaan ama dhammaan soo celiso kharashkii garyaqaankii aad uga faa'idaasatay lacag la'aanta.



Waxii aqbaar dheeraad ah ook u saabsan shaqada Laanta qarammada midowday u qaabilsan qaxootiga UNHCR waxaad ka heli kartaa mareegtan/ websaytkan:

<https://www.unhcr.org/be>



## 12. Ka waarran haddii aan doonaayo in aan ku laabto waddankayga?

Haddii inta hawshu kuu socoto ama ka dib aad doonaysid in aad waddankaagi ku laabatid, waxaad waydiisan karta borogaraamka dib u laabashada kaas oo ay Fedasil ku laga helo.



Waxii aqbaar dheeraad ah waxaad marwalba ka heli kartaa mareegtan/websaytkan:

<https://www.voluntaryreturn.be/>



Haddii aadan haysan dukumiintiga muhiimka ah si aad waddankaaga ugu laabatid, waxaad iska xaadirin karataa safaaradda waddankaaga, taas oo aad ka heli kartid baasaboora ama warqadda Go-home oo aad ku safri kartid.



Waxaad safaaradda iyo macluumaadkeeda aad ka heli kartaa websaytkan ka dib cinwaankan “ambassades en consulaten” (safaaradaha iyo qusuliyadaha) hoostiisa



<http://diplomatie.belgium.be>

Dib u laabasho deg-deg ah hadday jirto waxaad marwalba xiriir la yeelan kartaa unugga Dib uu laabasho Iskaa oo ka mid ah Xafiiska Socdaalka DVZ/OE adigoo adeegsanaya cinwaanka iimaylka soo socda :

[return@ibz.fgov.be](mailto:return@ibz.fgov.be)

### 13. Miyaa la' i hayn (xannibi) karaa inta nidaamka(hawsha) ii socoto?

Sharciga ajaanibta waxuu dhigaayaa in Xafiiska Socdaalku DVZ/OE in xaaladaha qaarkood uu go'aamin karo meel gaar ah(xero xiran) lagugu hayn (xanninbi) karo.

Codsadaha lagu hayo xero xiran waxaa suurto gal u ah inuu ka doodo xannibaadaa bishiiba mar horteeda Rugta Golaha ee Maxkamadda Darajada Koowaad (qaybta sixitaanka “anshaxa”) isagoo soo gudbinaya codsi sii deyn ah. Codsigan waa in loo qaabeeyaa si waafaqsan xeerar sharci oo gaar ah.

### 14. Muxuu ku samaynayaa xafiiska socdaalku “DVZ/OE” xogtayda gaarka ah?

DVZ/OE waxay hubin doontaa in xogtaada, oo laga shaqeeyay/habeeyay inta hawsha lagu jiro, la ilaalinayo/xafidayo taas oo si buuxda u waafaqsan AVG (Xeerka Guud ee Ilaalinta Xogta).

Waxaad arki doontaa warbixin badan oo ku saabsan AVG ama Xafiiska Laanta Socdaalka DVZ/OE ee ilaalinta macluumaadka oo ah [HALKAN](#) ama adiga oo adeegsanaya sawir/iskan koodka QR (scan QR-code) soo socda:



<https://dofi.ibz.be/en/about-us/processing-personal-data/transparency-information-data-subject/transparency-international>

## 15. Cinwaanno faa'ido leh:



**Adeegga Arrimaha Laanta Socdaalka (DVZ/OE)**  
Pacheco  
Boulevard Pacheco, 44  
1000 Bruxelles

Infodesk  
T +32 2 488 80 00

[infodesk@dofi.fgov.be](mailto:infodesk@dofi.fgov.be)  
[www.dofi.fgov.be](http://www.dofi.fgov.be)  
[www.ibz.fgov.be](http://www.ibz.fgov.be)



**Wakiilka Guud ee Qaxootiga iyo Dal Laawayaasha (CGRA)**  
Eurostation  
Rue Ernest Blerot 39  
1070 Bruxelles

T + 32 2 205 51 11

[cgra.info@ibz.fgov.be](mailto:cgra.info@ibz.fgov.be)  
[www.cgra.be](http://www.cgra.be)



**Golaha Xallinta Murannada (CCE)**  
Laurentide  
Rue Gaucheret 92-94  
1030 Bruxelles

T + 32 2 791 60 00

[info.rvv-cce@ibz.fgov.be](mailto:info.rvv-cce@ibz.fgov.be)  
[www.rvv-cce.be](http://www.rvv-cce.be)



**Golaha Dawladda (CE)**  
Rue de la Science 33  
1040 Bruxelles

T + 32 2 234 96 11

[info@raadvst-consetat.be](mailto:info@raadvst-consetat.be)  
[www.raadvst-consetat.be](http://www.raadvst-consetat.be)



**Fedasil**  
Rue des Chartreux 21  
1000 Bruxelles

T + 32 2 213 44 11

[info@fedasil.be](mailto:info@fedasil.be)  
<https://www.fedasil.be/>



**Adeegga ilaalinta**  
Boulevard de Waterloo 115  
1000 Bruxelles

T + 32 78 15 43 24

[tutelles@just.fgov.be](mailto:tutelles@just.fgov.be)  
<https://justitie.belgium.be/>



**Wakiilka Saree e Qarammada Midoobay (UNHCR Beljemka)**  
Avenue Louise 283  
1050 Bruxelles

T + 32 2 627 59 99

[belbr@unhcr.org](mailto:belbr@unhcr.org)  
<https://www.unhcr.org/be>

Editeur responsable : Freddy Roosemont - Boulevard Pacheco 44, 1000 Bruxelles - BCE 0308.356.862

- Ne pas jeter sur la voie publique -